Suuxinta guud ee ilmahaaga

Warqadan sharaxada ah waxay kuu faahfaahinaysaa dhamaan waxii aad heli lahayd markii aad ilmahaaga aad isbitaalka keento si loogu sameeyo qaliin iyo suxuudinta guudba Warqadan waxaa qoray dhakhaatirta qaabilsan suuxinta,iyagoo la shaqaynaya wakiilada bukaanada iyo waalidiintooda.

Suuxidinta iyo dhakhaatiirta qaabisan suuxdinta

cirbada suuxdinta guud ahwaa dawo xaqiijinaysa inta ilmahaagu qaliinka lagu samaynayo in uusan dareemin wax xanuun ah uuna ahaado miyir la'aan.

Dhakhtarka guud ee suuxinta qaabilsanwaxaa dhakhtar takhasuus u leh isticmaalka irbada suuxinta sidoo kale waxuu kor joogteeyaa xaalada caafimaad ee ilmaha inta uu qaliinka uu ku jiro ilaa inta uu miyirkiisa usoo noqonoyo. Sidoo kale waxay gacanta ku hayaan dawooyinka ilmaha lasiiyo ee ah xanuun baabiyaha ah qaliinka kadib,

dawooyinka suuxinta waxay ka koobantahay dawooyin loogu talagalay inay qofka suuxiso intii loogu tala galayna uu baaqi qofku ku ahaado suuxdinta.

- Dawooyinka suuxdinta qaar waxay ku bilowdaan cirbad qofka looga mudo xididka qoorta mara iyadoo la'isticmaalo silinge caag ah laguna magacaabo cannula,mararka qaarna gaas neef ah ayaa qofka afka loogu xiraa neeefta kasaacida qofka.
- Dawooyinka kale waxaa lagu bilaabaa gaaska oo ilmaha afka loogu xiro kadibna ilmaha markuu seexdo cirbadii silingada(cannhla) ahayd ayaa loo raaciya

Dhakhtarka suuxdinta qaabilsan ama kalkaaliyaha caafimaadka ayaa badanaa waxuu ku waydiinyaa inuu ilmahaagu uu hada kahor uu soo qaadtay wax cirbad suuxin ah. Sidoo kale waxay kaala hadlayaan qaababka loo siinayo cirbada suuxitaanka, iyo qaabkii suuxitaan ee adiga iyo ilmahaaguba aad doorbidaysaan. Badanaa waxaa jira sababa caafimaad oo khasbaya in hal qaab oo kaliya wax loo sameeyo,marwalbana dhakhaatiirtu diyaar ayay u yihiin

inay kaa qanciyaan sababta ay u doorbidayaan inay u bilaabaan dawada suuxinta. Waxaa muhimadeeda le inaan mar walba tix galino waxaa aad rabo iyo ilmahaaga waxa uu rabo.

Markii aad dhakhtarka qaabishan suuxidinta wada hadlaysaan ,wada hadalku inta badan waxa uu noqonayaa sida soo socota . Mararka qaar waxii la qoondeeyay ayaa laga yaabaa inay wax iska badalaan,iyadoo mar walba ay ku xiran tahay sidaan wax uga qabano ugana falcelino xaalada qaar ee adag.

Waad soo jeedin kartaa dhamaan waxii aad qabto oo su'aalo ah ha'aato marlinka qaliinka ama intaan qaliinka lagaarinba.

Waxaad kalood samayn kartaa inaad la kulanto Iskaashatooyinka Suuxdinta kuwaasoo leh tababaro aad usareeya dhanka xirfadaha daryeelka caafimaadka. Si'aad uga hesho faah faahin dheeraad ah kooxda noo qaabilsan suuxdinta waxaad ka aqrisan kartaa boga aan interneetka ku leenahay ee ah: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-team

Soo diyaarinta ilmahaaga.

Dhowr arimood ayaa kuu banaan si aad ugu diyaariso ilmahaaga imaanshaha isbitaalka.

Haduusan ilmahaagu ahayn mid aad yar waxaad isku daydaa inaad sharaxaad kasiiso:

- Inaad isbitaalka aadaysaan
- Aadna samaynaysaan qaliin ama baaritaan caafimaad
- Waxaad kalood sii saa warbixinaha asaasiga ah ee uu ubaahan yahay waxa dhacaya markay isbitaalka tagaan.

Xiliga ugu fiican ee warbixintan caruurta lasiinayo way kala duwan tahay iyadoo ay ku xirantahay hadba ilmaha da'da uu marayo. Ilmaha aan gaarin xiligii iskuulka kaliya waxay ubaahanyihiin warbixintaas in loo sheego maalin kahor aadista isbitaalka. Kuwa qaan gaaray xiligii iskuulkana waxay ubaahnaanayaan waqti intaa kabadan.

Waxaad kalood heli kartaa warqad ay ku qoranyihiin warbixinaha cadaynaya da'ada kala duwan,*taaso loogu talagalay in aqristaan waalidiinta iyo caruurta iyo kuwa daryeela caruurta* waxaadna kala soo bixi kartaa noqol warqadaas ah boga internetka uu kolejku ku leeyahay: www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali

- *Waxaad heli kartaa sheekada magaceedu yahay Rees Bear has an anaesthetic*ee ilmaha loo aqriyo marka lasuuxinayo qof wayna uu aqrinayo waxayna ku haboontahy(ilmaha da'doodu u dhaxayso 3–6)
- *iyo sheekada kale Davy the detective ee cinwaankeedu yahay wax ka ogow waxa ay tahay dawada suuxinta* kuna haboon ilmaha da'doodu udhaxayso (7–11 years)
- *Suuxinta guud:talabixin kooban kuna wajahan da'yarta* (dhalinyarada da'adoodu tahay 12 iyo kabadanba).

*My Daycase operation: an Easy Read iyadana waa warbixin aad usahlan aqrinteeda*waana ilaha warbixinaha ku'aadan suuxdinta laga heli karowaxaadna ka heli kartaa barta internetka:
www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali

Waxaa kaloo iyadana jirta iyadoo lagu jirliyato sheeko qaab kaartoonka caruurta ah taasoo lagu magacaabo *A Little Deep Sleep –taasoo loogu talagalay faamilka inay ku fahmaan waxa ay suuxintu ay tahay* aasoo aad wax tar ugu leh caruurta da'doodu tahay 12 iyo ka wayn: www.vimeo.com/138062201

Isbitaalada qaar waxay caruurta u ogalaadaan intaan qaliinka lagu samayn inay soo booqdaan qaybta laseexiyo caruurta qaliinka lagu sameeayay. Waana arin aad ufiican in lasameeyo si looga yareeyo ilmaha walaacii uu ka qabay qaliinka. Isbitaalo badan ayaa waxay leeyihiin kooxo uqaabilsan inay usharaxaan ilmaha qaabka suuxdinta iyagoo dhiiri galinay isticmaalayana qaab bandhig faneed ah

Fikarada qaar eed ilmahaaga aad la wadaagi karto

- Usharax ilmaha in qaliinka ama baaristu ay xaaladiisa caafimaad ay hagaajinayso si guud ahaan ama qayb ahaan iyadoo hadba duruufta ay ku xirantahay.
- Ku dhiirigeli ilmahaaga in uu kaala hadlo arimaha qaliinka su'aalona uu kaa waydiiyo. Boogaagta aqriska,gaymka laciyaaro,sheeko caruureedka,intuba waa wax kaalmeynaya ilmaha. Dhamaan waxaa aan soo sheegnay ilaha aad ka heli karto waxaa kamid ah sida waraaqada midabaysan ee laga heli karo boga internetka kolejka:
  www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali
- U sheeg ilmahaaga xiliga ay galayaan: Qaliinka ama baarista? Sidoo kale u sheeg imisa maalmood bay joogayaan isbitaalka (hadii aad garanayso)?

Hadii uu ilmuhu uu joogayo isbitaalka habiinka waa inaad u sheegta inaad la joogi karto. Hadii aadan arintaa aadan hubin waxaad wici kartaa isbitaalka si'aad u hubsato in aad habeenkii laseexan karto ilmahaaga .

Shqaalaha kalkaaliyasha caafimaad ayaa kuu sheegaya waxa la'ogolyahay eed isbitaalka usoo qaadan karto.fadlan hakasoo tagin dawadii uu ilmaha sida joogtada ah u qaadan jiray,sidoo kale dharkiisa kuwa lagu seexdo,dawada lagu cadaydo,shanlo,dharka hoosta laga xirto,alaabaha uu xiiseeyo ee caruurtu ku ciyaaraan sida boonbalada caruurta. Ilmuhu aad bay ixiiseeyaan waxa lagu ciyaarayo laakiin ma'aha in uu ku talax tago oo uu qalab badan oo ciyaar ah uu isbitaalka usoo qaato.

Taleefonka gacanta ama tablekata kunbutarka yar ah aad ayay u caawinayaan laakiin waa inaynan kasoo tagin fiilooyinka dabka siiya batariga.

Horay usii gado oo guriga sii dhigo dawooyinka xanuun babiyaha ah sida paracetamol iyo ibuprofen si ay diyaar kuugu ahaadaan marka ilmaha isbitaalka laga soo saaro. Dhakhtarka ayaa ku siinaya wixii talooyin ah ee kusabsan sidii aad us isticmaali lahayd dawooyinkaas xanuun baabi'yaha ah.

Mahaboona in la qaato qaliinka ka hor

Lasoo socdsii cusbitaalka hadii aad ilmaahaga ku aragto qufac badan ama qobow jirka uu ka galo intaan qaliinka lagu sameen laba isbuuc kahor,ama aad ku aragto calool shuban ama mantaq siyaada ah intaad qaliinka lagu samayn malin yar kahor maalinta ilmaha qaliinka lagu sameeynayo. Waxaa suura gal ah in loo baahdo in balintii qaliinka dib loo dhigo ilaa ilmuhu uu kasoo kabanayo xanuunada la soo sheegay.

Hadii ilmuha uu la kulmo qabow ama iyo qufac waxay ilmaha u keeni karaan dhib badan oo xaga neefsiga ah marka suuxdinta lagu sameeyo, haba usii daraanaadeen ilmaha aad usii yar yar, Waxayna ilmaha ku sababi karaan xanuunadaas una keeni karaan khatar aas usaraysa iyo caabuq ku dhaca laabta iyo sanbabada ilmaha. Sidaa darteed waa muhiim inaad shaqaalaha isbitaalka u sheegta hadii ilmuhu wax xanuun ah uu qabo.

Fadlan usheeg shaqaalaha isbitilaaka hadii dhawaanahan uu ilmuhu ay ku dhaceen xanuunada busbuska,jadeecada iyo caabuqyada kale ba

Talaalku waa muhiim waxanu ka hortagaa dhibatooyinka caafimaadka waxan walidiinta ku dhiirigalinaynaa inay racaan NHS maclumaadka talaalkeeda. Tarta www.nhs.uk/conditions/vaccinations

Talaalkii dhawanahan wax dhib ah umalahayn carurrta hadii lasiiyo daawada suuxinta waxase laga yabaa inay ku abuurto heerkul sareeya ka hor intaan lagaarin waqtiga qaliinka, xaladan oo kale waxa fiican in qaliinka dib loo dhigo. Tani waa xalad ugub sidas daradeed waxan walidiinta kula talinaynaa inay talaalka sii wadaan dibna aysan udhigin qaliinka daradiis.

Wiisada qiimeysa qaliinka ka hhor (kahor-qiimaynta wiisatada)

Kalkaaliso ka socota isbitaalka ayaa laga yabaa inay kusoo wacdo si'aykuu waydiiso xalada cunugaga cafimadka iyo dawooyinka ka hor malinta qaliinka. Tani waxay fursad sinaysaa inla isku diyariyo iyo in baritaan ama qalab ladiyariyo hadii loo bahdo ka hor malinta qaliinka.

Isbitalado badan ayaa carurta xanuunada culus qaba ama qaliinada adag galay ku soo dhaweeya inay ka qayb galan wiisitada qiimaynta qaliinka ka hor. Su'aalaha hoos ku qoran waxa wax lagaa waydiin waxyaalaha laga yaabo inaad soo martay ee saamayn kara caafimaadka qoyskaaga iyo ilmahaaga. Waxay maqaarka ku xogidoonan suuf si'ay uhubiyaan wax caabuq ah ka hor qaliinka waxay kaloo sameyaan baritaan dhiiga ah, hadii gala fursan waayo. Waxay awoodan inay adiga iyo cunugagaba idin tusaan qaybta aad aadidontan waxayna idin siin donaan war bixinta qaliinka cunugaga. Waxa laga yabaa inaad lakulanto qofka ku taqasusay dawada suuxinta kasoo kala hadlidona kala dorashada dawada iyo qatarteeda.

fiirsashada akhriska cunuggaaga

Isbitaalku waxa uu kusiin donaa qoraal cad oo ku saabsan xiliga cunugagu uu jojinayo cunida iyo cabida. Waa muhiim in aan la kulmo adiga iyo cunuggaaga (carruurtaada) si aan uga wada hadalno walaacyadan. Hadii cunto ama cabitaan uu cunugaga calooshisa kujiro xiliga suuxinta, cuntadu waxay usoo guraysaa dhuunta hoosteeda waxayna dib ugu labanaysaa sanbabaha.

Caruurta way sahlantahay hadii aysan waqtidheer sugin cuntada iyo cabida.

Kuwaan soo socda waa xiliyada laysku waa faqsanyahay inaad cunugaaga wuxuu cuno ama cabo siin karto hadii asyan qalad qaliin jirin. Lakin fadlan raac amarada aykusiyaan isbitaalku, waxa laga yabaa inay tahay midka duwan tiihore.

- Caruurta waa lasiin karaa cunto fudud ama galas canaa lix saacka hor qaliinka. Waa inaysan wax cunin waxna cabin xitaa macmacaan waa inayna iska ilaaliyaan xanjo.
- Naaska waa lasiin karaa cunuga 4 saac ka hor qaliinka.
- Basaasada waa lasiin karaa carurta ka hor 6 saac qaliinka, (fadlan hubi isbitaalka waxa laga yabaa inaadka hesho maclumaad ka duwan kii hore oo ku sabsan carurta aan bilo dhamaysan.
- Caruurta way cabikaraan biyo ama biyo labarxay ka hor halsaac qaliinka. Tani waxay ku caawinaysaa inuu jirkoodu qoyo ama aynastaan.

Qabo ka mid ah isbitaalka ayaa u ogalada carurta inay wax cabaan islamarkay qaybta yimadaan.

Hadii cunugagu cunto mardhaw cunay qaliinka dib ayaa loo dhigaa ama dib ayuu u dhacaa malin kale.

Waxay kugula talinayaan dawada aad qaadanayso maalintaad qaliinka galayso iyo waxyaabaha xanuun baabi'iye ahaan u qaadanaysid markaag guriga ku noqoto oo aad xaalada bogsashada ku jirto.

Markad isbitaalka imaato miisan ayaa lasaraa cunugaga wana la cabiraa (hadan midan horay loo samayn). Kalkaliso ayaa firinaysa xumadooda, iyo xadka neefsashada iyo inla cabiro hawaqadashada dhiiga.

Waa hab raac in uurlaga baaro dhabdhaha ka wayn 12 sano siyadoo kaadi laga qadaa. Fadan fiiri Royal College of Paediatrics and Child Health. Cinwaankiisa warbixin dheraad ah.

www.rcpch.ac.uk/resources/pre-procedure-pregnancy-checking-under-16s-guidance-clinicians

Kalkalisadu waxay waydiin doontaa waado ama kor cun cun waxayna ku xiraysaa labo calamadood oo aqoon si ah gacanta iyo lugta cunugaga. Isbitaalada qaar waxay ku xiraan calamad dheerad ah ama mid kalar kale ah hadii cun cun jiro.

Qofku taqasusay daawada suuxinta ayaaku soo booqan doona ka hor cirbada suuxinta.

Qofka ku taqasusay dawada suuxinta wuxuu rabaa inuu helo dhamaan xalada caafmad ee cunugaga.

- Waxay kaala hadlayaan dhibaatada kaaga imaan karto suuxdintta adiga.
- waxqabadyo gaar ah.
- Ma jiraan wax xasaasiyado ah?
- qufac dhawanahaan, hargab ama shuban ama matag.

Hadii cunugaga ama qof qoyska ka mid ah uu horay xalad qatar ah oo ku saabsan dawada suuxinta, waa muhim inaad usheekto dhaqtarka dawada suuxinta, siina wixii warbixin ah oo qoysku haayo.

Waa waqtiga ugu fiican oo looga hadli karo wixii su'aalo ah oo adiga iyo cunugagu aad ka qabtaan dawada suuxinta. Waydii Adeegyada Xubinta liiska daawooyinka kuwaasi oo lamid ah kuwa aad doonayso inaad qaadato.

Iyadoo loo firinaa qaliin noo cee ah uu galayaa, dhaqtarka waxa laga yabaa inuu kababyeeyo neerfaha isagoo ku duraa cirbada suuxinta xiligaas oo cunugaagu hordaa si'ay ugu caawiso xanuunka.

Waaxda Adeegyada Bulshada waxay sidoo kale u baahan kartaa inay la xidhiidhaan dhakhtarkaaga indhaha si ay u baadhaan baahidaada muraayadaha. Way kala hadlidonaan sababaha arintaan loo samaynaa iyo muhiimada qalabkaan ku cawinaa cunugaga badbaado iyo nasasho xiliga uu jiifo ama uusoo jeedo.

Daahinta qaliinka iyo baritaanka

Badanaa xiliga cunugaga baritaankiisa, dhaqtarka waxa laga yabaa inuu kala hadlo waxku saabsan cunugaga waxa lagayabaa inay badbaado utahay malintaas qaliinkeeda. hadii taaasu dhacdo, waykula talinayaan gorma ama xiliga macquulkaa oo laguda galayo qaliinka.

Ka hor daawada (daawo ka hor)

Taasina waa janadii aad ku dhaxasheen waxaad camalfalayseen.

Waa maxay siyaabaha aad canugaaga guriga ugu caawisid? Si kastaba, kuwani looma bixiyo si joogto ah iyaga oo ka dhigi kara caruurta wax dawaqsan qaliinka kadib. Dawooyinka xanuunka baabi ‘iya ayaa sidoo kale daawo-hor dhac ahaan loo siin karaa, ama dhaqtarka suuxinta ayaa soo jeedin kara daaweyn dheeraad ah sida xaaladaha neefta.

Inta badan dawooyinka-hordhaca ah waxaa loo bixiyaa sida dawooyin dareera ah.

kareemka suuxinta gudaha ah

Ku dhowaad dhamaan caruurta ayaa yeelan doona 'Kareem la yaab leh' la marin doona dhabarka dambe ee gacmahooda laguna dabooli doona dhar cad. Tani waxaa mararka qaar loogu yeeraa 'Ametop; 'EMLA' ama magac ganacsiyeed kale. Waa Kareemka suuxinta ee wadanka gudihiisa laga helo kasoo qaato 30-60 daqiiqadood inuu shaqeeyo.

Kareemkan wuxuu yareeyaa xanuunka saaidka ah marka dawada cannul lagu xiraayo gacanta ama cududa canugaaga. Waxay yareysaa xanuunka si fiicana ugu shaqaysaa tobonkiiba sagaal cunug.

Haddii aan kareemka la isticmaali karin, intii mee kaliya dareen laga qaadi lahaa kabuubyo ahaan waxaa beddelkeeda la isticmaali karaa buufiska qabow ee suuxinta kooban ah.

Aadidda qolka qaliinka

Inta badan isbitaalada waxay canugaaga siinayaan marayo qurux badan si uu xirto marka uu aadaayo qolka qaliinka. Inkasta oo uu canugaaga awoodi karo inuu xirto dharkiisa ama bijaamadiisa. Waxay xiran karaan xafaayad ama hoos gashi sida loogu baahdo. Kalkaaliyahaaga ayaa kaala talin doona hoos gashiga la xiran karo.

Canugaaga waxaa laga yaabaa inuu socod ku tago qolka qaliinka, ama ku soo safro sariir, baskiil ama bareelaha isbitaalka, ama loo xambaaro. Waaxyaha qaar ayaa bixiya noocyo la yaab leh oo gaadiid ah. Isbitaalada qaar ayaa laga yaabaa inay bixiyaan gaari koronto kushaqeeya.

Gudaha qolka suuxinta

Kalkaaliyaha ama dhakhtar daryelka caafimaadka kasoo taqasusna u leh inuu sii mada daaliyo ilmaha kana socda qolka buukaan jiifka ayaa adiga iyo canugaaga kuu wehlin qolka suuxinta. canugaaga wuxuu awoodi doonaa inuu qaato qalabka caruurta ku ciyaaraan ama wax farxad geliya. Taleefonada gacanta iyo tableetyada ayaa sii fiican iyagoo ay caruurtu ka helayaan mashquul iyo ciyaaro ama aflaamta ay jecelyihiin.

Haddii aad dooneysid , waa laguugu soo dhoweynayaa inad la joogto canugaaga si aad u farxad geliso inta la siinaayo dawada suuxinta. Waxaa jira daruufo qaar oo aynan arinta aynan suuroobi karin. Mar alaale oo ay suura gal noqoto inuu ilmahaagu seexdo ayaa xubin kamid ah shaqaalaha isbitaalka ay kaa kaxeen doonan gaynayaana qolka qaliinka si loogu ogolaado kooxda qaliinka inay canugaaga latacalaan daryeelkiisa.

Haddii aad si'aada u walaacsantahay, **ma ahan inaad** u wehliso canugaaga qolka suuxdinta. Xubin kaloo qooska kamid ah oo qaangaar ah ama kalkaaliye ama dhakhtarka ilmaha madaxa udajiya ayaa raaci kara adiga beddelkaaga.

Suuxinta ayaa laga yaabaa inay bilaabato inta canugaaga uu ku jiifo bareelaha. Caruurta yar yar waxaa laga yaabaa ina la suuxiyo iyaga oo dhabtaada ku fadhiya. Shaqaalaha ayaa kadib kuqaadaya bareelaha, lagana yaabo inaad caawiso.

Dhaqtarka suuxiyaha wuxuu ka isticmaali doona gaas hawoqabow ah ilmahana afka laga siinyo iyadoo loosii marinyo maaskaraatda wejiga ama tuubo, ama cirbada kaanule mid uun si loo bilaabo suuxinta. Arimahan aan soo sheegnay oo dhana waa laga la soo tashanayaa intaan lasmayn, inkastoo mararka qaar laga yaabo in qorshaha la beddelo haddii uu canugaaga usan sifudud ula qabsan.

Inta badan caruurta waaween cirbadda ayay ku qaadanayaan dawada suuxdinta. Haddii cirbada la isticmaalo , sida caadiga ah canugaaga wuxuu sida ugu dhaqsaha badan u noqonayaa qof miir-daboolan ama culus. Mararka qaar cirbadda qabow ama jariiraco ayaa laga dareemaa gacanta. Dhakhtarka suuxiyaha inta kadib wuxuu kuxiri doonaa maskaraatada afka lagu xiro si uu u sii wado dawada suuxinta uuna siiyo hawo dheeraad ah badqabka ilmaha awgiis.

Haddii suuxinta lagu bilaabay gaas , suuxiyaha wuxuu guud ahaan isticmaalaa maskaraato si uu u siiyo gaaska, ama waxaa laga yaabaa inay gaaska ugu gudbiyaan sacabada oo si deggan loo dul saaraayo sanka iyo afka canugaaga. Gaaska suuxinta wuxuu u uraa/shiiraa sida qalimaanta midabada badan usoo uraan.

Sida caadiga waxay qaadataa in yar(laga bilaabo ilbiriqsiyo gudohood ilaa labo daqiiqo) inay suuxinta falgasho. Waa wax iska caadi ah inuu canuga noqdo mid aan degganeen inta lagu jiro waqtigan ama ay neefshadu u shanqarto si kale. Waxaa xitaa laga yaabaa inay si weeyn u quuriyaan. Shaqaalaheenu waxay kaa caawin doonaan inaad u qabato canugaaga si deggan hadana taxadar leh.

Kadibna waxaa lagu weydiin doonaa inaad ka baxdo qolka suuxinta.. Xubin ka tirsan shaqaalaha ayaa kuu raaci doona dibadda qolka qaliinka.

Marka canugaaga la suuxiyo, suuxiyaha wuxuu ku xiri doonaa canuule(caaga cirbada wata ee gacanta lagu xiro) si markaasi loo siiyo dawada xanuun baabi'iye iyo dawooyinka suuxinta ee loo baahanyahay.

Maxaa dhacay oo intaa xiga?

Canugaaga waxaa loo qaadi doonaa qolka qaliinka si uu u helo qaliinka ama udiyaarinta qaliinka hoolaheeda.

Suuxyaha ayaa la joogaayo canugaaga ilaa inta howsha qaliinka lagu gudo jiro dhamaan. wuxuuna kormeeri doonaa heerka sara ukaca dhiiga canugaaga, garaaca wadnaha, neefsashada iyo heerka hawa qaadashada, isaga oo hubinay intuba inay badqabaan ilmuhuna uu suuxsanyahay gabi ahaanba.

Hadda waa waqti ku fiican inad baxdo oo aad wax soo cunto soona cabto, una sheeg shaqaalaha isbitaalka inaad saa samaynayso una dhaaf shaqaalaha nambarkaaga si ay kaagala soo xiriiraan.

Qaliinka kadib

Qolka soo bogsashada

Inta badan caruurta way kusoo kacaan qolka soo bogsashada. Suuxiyaha qof marwalba la heli karo oo ka ag dhow y wuuna ku caawin karaa haddii loo baahdo. Faashad ayay ku xirayaan meeshii caagi cirbada watay gacacta looga xiray markii u horaysay wayna qarinayaan si aynan usoo bixin,ilmuhuna uusan u arag markay soo kacaan.

Canug kasta waxaa sida ugu fiican u xanaaneeya kalkaaliye qabiir ah ama xirfadle kale oo tababaran kasoo xaqiijin doona in uu canuga dhib la,aan yahay. Waxay siin doonaan xanuun baabi,iye dheeraad ah iyo qandho jibiye haddii loo baahdo. Xiliga ugu haboon ayaa laguu yeeri doonaa si aad ula joogto canugaaga xiliga soo kicidda.

Walbahaarka soo kicidda

Caruurta qaarkood ayaa soo bandhiga astaamo jahawareer iyo/ama walbahaar marka ay soo kacaan. Tani waxay ku badantahay caruurta aadka u yar.

Caruur aan badneen ayaa noqoda wax aad u careeysan. Waxaa laga yaabaa inay ooyaan oo raftaan ama ay ruxaan gacmahooda iyo lugaha. Dabeecadahan waxay ilmuhu kaga dhamaadaan 30 daqiiqo, mararka qaarna inay intaa kabadnaato ayaa suura gal ah, Shaqaalaha qolka soo bogsashada waxay qibrad u leeyahiin xanaaneynta cariurta waqtigan. Shaqaalahu waxay kabaraan dagaan haddii bukaanku ubaahan yahay xanuun baabi,iye dheeraad ah kasoo caawin doono. Waxay kaala talinayaan sida ugu wanaagsan ee loo daji karo dareenka iyo badqabka canugaaga.

Haddii canuga la soo kaco walbahaar tani waa wax caadi ah in uu waalidku u keeno walaac. Way wanaagsan tahay inaad sheegto dhakhtarka suxinaya ilmahaaga haddii uu horaan canugaaga ula kulmay walbahaarka noocan ah si ay markaasi kaagala xaajoodaan qaababka looga foogaan karo mustaqbalka.

Xanuun baabi'in

Dawooyinka xanuunka joojiya, iyo mararka qaarkood cirbadaha suuxinta wadanka lagu samaeeyay, ayaa la siiyaa xiliga suuxinta si loo xaqiijiyo in canugaaga usoo kaco sida ugu dareen yar ee ugu macaquulsan. Nooca xanuun baabi'iye ee la'isticmaalayo waxay ku xirnaan doontaa hadba qaabka laqaadanayo ee suuxinta ah.

Dhakhtarka suuxiyaha, kan qaliinka ama shaqaalaha qolka bukaan jiifka waxay kaala hadlayaan nooca ugu wanaagsan xanuun baabi'iye ee ilmahaaga lasiinayo.

Aadista guriga

Intabadan waa suuragal in ilmahaagu guriga ku noqdo isla maalinta qaliinkaba haddii dhaqtarka qaliinku iyo kan suuxiyaha ay ku qancaan arintaa inay tahay talaabo laqaadan karo hadana aan dhib ka'imaanaynin ilmuhuna si fiican u soo bogsanayo.

Waxaa lagu siin doonaa talooyinka ku saabsan sidii aad ugu siin lahayd guriga dawooyinka xanuun baabi'iyaha ah. Si taxdir leh waa inaad u raacdaa talooyinkan.

Caruurta waxay dareemaan xanuun ama waxaa laga yaabaa inay ku xanuunsadaan safarka ay guriga ugu noqonayaan. Waxaa wanaagsan inaad diyaar u ahaato.

Haddii aad ilmahaaaga u qaadeyso guriga maalinta qaliinka, waxaa lagu siin doonaa nambarka aad lasoo xiriiri karto haddii aad markaad guriga ku noqoto aad dareento wax walaac keeni kara.

Wixii intaa ka dambeeya

Caruurta qaarkood way ka walaacan booqashada isbitaaklka. In yar oo kamida caruurta si fiican umma seexdaan markay isbitiaalka booqdaan kadib. Waxaa laga yaabaa inay kuugu dhegaan kana walwalaan inay adiga kaa tagaan. Debeecaddooda ayaa lagayaabaa inay aad uga adkaato sidii hore. Badanaa se arinku caadi ayuu kusoo noqdaa seddex ilaa afar isbuuc gudahooda.

Halista iyo waxyeelooyinka kale ee la xiriira suuxinta ilmahaaga

Badaanaa waa waxaan dhicin in la'arko khatar caafimaad inay keen sadaan qaababkan casriga ah ee hada loo isticmalaalo suuxdinta. Inta badan caruurtu si dhakhso leh ayay uga soo bogsadaan isla markiina caadi ayay kusoo noqdaan kadib qaliinkooda iyo suuxintooda. Caruur badan ayaa xanuun dareema ama yeesha dhuun xanuun. Xanuunadaasna badanaa waxay ku dhamaadaan waqti yar. Dawooyin lagu daweeyo matagga iyo xanuunka ayaa badanaana la heli karaa oo la lasiiya ilmaha hadii lagu arko arimahaas.

Ilmaha caafimaadkiisa wacanyahay ee lagu sameeyay qaliino yar,ayaa way u badan tahay (in ka badan Hal 10Kii caruur) inay yeeshaan:

- Madax xanuun ama Cune xanuun
- Jiro iyo dawakhaad
- Xanaaq xiliga soo kicidda

Marka la fiiriyo dhibaatooyinka aadka u naadirka ah, kuwaaso lagu arko qiyaasti Hal 10,000 kii caruurba ayaa ku yeesha xasaasiyad aad u daran dawada suuxinta.

Halista ay suuxintu ku keensan karto caafimaadka caruurta markii lagu sameeyo qaliinada yar yar, ama kuwa meel dhexaadka ah,waa halis la dhihi karo waxay kayartahay wax kayar Hal 10,000 kiiba. Inta badan dhimashooyinka dhaca xiliga qaliinka ma'aha kuwa si ay si toos ah ay u keenaan dawooyinka suuxinta, laakiin waxaa keena sababo kale oo ku xiran caafimaadka shaqsiga ama qaliinka ay yeelanayaan.

Si aad u aqriso wax ku saabsan qataraha la xiriira suuxinta qofka ama suuxdinta qaliinka, fadlan waxaad booqataa bogeena internetka:
www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali

Sharaxaad khataraha iman kara

Dadka way ku kala duwanyihiin sida ay u turjuntaan ereyada iyo tirooyinka. Cabirkan ayaa ah mid aad kuu caawinayo.

aad u badan	caadi ah	aan badneyn	Naadir	Aad naadir u ah
Hal 10kiiba	**1 qof 100kiiba**	**Hal qof 1,000Kiiba**	**1 qof 10,000ba**	**100,000 kiiba 1**
1 qof oo qoyskaaga ah	hal qof oo kusugan waddo.	Hal qof ku sugan tuulo	Hal qof oo kusugan magaalo yar	Hal qof oo kusugan magaalo weyn

Waa wax aan badnayn inay dhacaan wax dhib ah inay ka dhashaan suuxinta casriga ah ee baryahan la'isticmaalo.

in ilmahaagu ay ku timaado khatar sare ama xaaladiisa caafimaad oo kasii darto ayay ubadantahay haddii uu ilmahaagu leeyahay jiro daran, xaalad caafimaad oo adag, ama uu ka yar yahay da,da afar sano /amaba uu galayo qaliin weeyn.

Caruurta leh jiro culus ama dhalaanka yar ee galaya qaliinka ayaa mararka qaar la kulmi kara qataro qaas ah oo la xiriira suuxinta. Dhakhtarka suuxiyaha ayaa kaala xaajoon kara arinkan ka hor intaan qaliinka lasamayn. Isticmaalka qalab casri ah, tababaro badan iyo dawooyinkaba ayaa waxay sahleen samaynta suuuxdin aan qatar lahayn, hadana waxaasoo jira wali lama dhihi karo khatartii oo dhan meeshii waa laga saaray.

Waxaa jira cilmi baaris socota hada kuna saabsan saamaynta xiligi fog ah ee ay suuxintu ku leedahay dhalaanka iyo carruurta yar . Waqtigan xaadirka ah majiraan wax caddeymo xooggan ah oo sheegaya inay suuxintu ay halis u tahay koriinka ilmaha, waana muhiim in la tixgeliyo qatar kasta oo imaan kartana la loo barbar dhigo sida ay muhim u leedahay suuxintu marka qaliin lasamaynayo.

Macluumaadka kusaabsan dhacdooyinka adag ee suuxinta caruurta waxaad kalood ka heli kartaa intarneetka: *Shilalka dhacdooyinka aadka u adag ee suuxinta caruurta ee guduha wadanka ingriiska : falanqeynta heerka labaad ee habanka loo adeegsado suuxdinta ilmaha iyo waxii lagu ogaaday dabagalkii tijaabada (daraasadda APRICOT):* www.onlinelibrary.wiley.com/soo/abs/10.1111/anae.14520

Hadii aad ubaa hato waxaad kaloo heli kartaa warbixino intaa kasii faahfaahsan oo ay diyaariyeen ururka iskaashatooyinka suuxiyayaasha caruurta ee wadanka ingriiska iyo Ireland:

www.apagbi.org.uk/guidelines ama
www.apagbi.org.uk/children-and-young-people

Macluumaadka ku saabsan halisaha guud ee ka'imaan karta samaynta suuxinta ee caruurta iyo dhalinyarada ayaa laga heli karaa boga uu kolejku internetka ku leeyahay: www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali

Macluumaad kusaabsan xanuun baabi'iye waxaa laga heli karaa warqad qoraaldeena *ee sharaxaysa Suuxinta* taasoo laga heli degelkeena: www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

Noo sheeg waxaad u malayso

Wan soo dhawaynaynaa talo soo lagu hormarinaayo warqadan.

Haddii aad heyso faalo ah oo aad jeclaan laheed in aad bixiso, fadlan ku soo dir iimeeylka: patientinformation@rcoa.ac.uk

Royal College of Anaesthetists
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

www.rcoa.ac.uk

Daabacaaddii Lixaad, Febraayo 2020

Warqad qoraalleedkan waxaa dib loo eeggi doonaa seddex sano kadib lagabilaabo taarikhda la daabacay.

2020 Royal college of anaesthetists
Warqad qoraalledkan waa lagala bixi karaa nuqul kale hadii ujeedadu ay tahay in qofka bukaanka ah uu kahelo warbxin oo dana kale laga rabin. Fadlan soo xigo dhamaan waxa ku qoran warqadan, oo ha'iska isticmaalin waxa qoran warqadan odoon magaca warqadan aan kadhigin ilaha warbixineed eed ka soo maan guurisay warbixintaas. Haddii aad dooneysid in qayb warqadan kamid ah aad u isticmaasho daabacaad kale,waa in looqiraa warqada waxii abaal ah waana in laga jaraa calaamdaha, astaanta iyo sawirada waraaqda. Hadii aad ubaahato macluumaad dheeraad ah Fadlan nala soo xiriir.